

# TALODA QARANKA EE CUSUB EE LAGA SII ADKEEY

Laga bilaabo 14 Diseembar ayaa waxa shaqeynaaya xeerarka qaranka ee laga sii adkeeyay iyo talobixinta guud ee ku saabsan inay masuulida qof kasta saaran tahay sidii looga hortegi/baaji fayruska covid-19. Dhamaan qof kasta oo bulshada ka mid ah, shakhsiyaadka gaarka ah iyo dadka wax-qabadyada ka mas'uulka ahba waxa saaran masuuliyada ay ku qaadayaan tallaabooyin loogaga hortagaayo faafitaanka fayruska. Waxay taasi sidoo kale khuseysaa dabaaldaga xafladaha.

Waxa adiga ku saaran masuuliyad shakhsi ahaaneed si aad naftaada iyo ta dadka kaleba uga ilaalineyso faafitaanka covid-19! Laga bilaabo 14 Diisembar ayay masuuliyad kaa saaran tahay inaad:

- Guriga joog haddii aad calaamado leedahay
- Xadid xiriirada dhow dhow ee cusub
- Masaafad u jirso dadka kale oo iska ilaali meelaha saxmad/ciriiri badan leh
- U safar sida ugu suurtoogalsan ee aan fayruska la iskugu qaadsiineynin
- Guriga ku shaqee illaa intaad karto
- Nadaafada gacmaha aad loo ilaaliyo
- Taxaddar samee markaad booqaneyso dadka 70+ ah ama ka tirsan kooxda khatarta ugu jira



Wax dheeraad ah ka akhri